JAMHUURIYADDA DIMOQ. SOOMAALIYA
DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

**DAWLADDA HOOSE EE XAMAR**

**QAYBTA DHULKA RASMIGA AH**

## SIIN DHUL

iyadoo la arkay ogolaanshihii Guddiga

ee D/HOOSE EE MUQDISHO, FADHIGII 3 AAD EE 20/4/1989.

markay taariikhdu ahayd B.L. 45 EE 16/4/1989.

kuna saabsanayd naqshadii dhismaha oo u keensaday Jaalle CABDULLAHI MAXAMUUD MURSAL .

kaasoo horay u soo weydiistay gabal dhul dhismood ah oo ku yaal MUQDISHO,DEGMADA WADAJIR.

iyadoo la arkay warqadii tiradeedu ahayd DH/MG/W/DH/981/89

oo waaxda dhismaha iyo dhulka taariikhduna ahayd 6/6/1989., laguna amraayey xafiiska farsamada dhulka inuu wareejiyo dhulka ujeeddada ku qoran.

Sanadii KUN SAGAAL BOQOL SIDDEETAN IYO SAGAAL.

maalintii 7/6/1989 ee bishii J U U N Y O

Jaalle JEOM. CALI AXMED MAXAMED

ee ka tirsan Xafiiska Farsamada Dhulka u amarayna maamulaha Waaxda

Wuxuu tegey meeshi dhulka ku yiil, sidey caadadu ahaydna isagoo jooga qofkii la siinayey dhulkaas wa-xaa la tusay geesihii tasoo wafaqsan qorshaha mag-aalada :

waxayna u egtahay sida soo socota :

Waa Gabal Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho,Degmada Wadajir, Qaabkiisuna yahay Trabesiyo,addimihiisuna yihiin $\frac{(10+20)X40}{2}$ kuna fadhiya 600/=MQ.- . .

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

WAQOOYI WAXAA KA XIGA: W a d d o

KOOFUR " " " : Dhul Lambar 364 W.

GALBEED " " " : Dhul Dad

B A R I " " " : Dhulkiisi hore.

Si lagu caddeyo qaabka iyo caddada dhulkaas wa-xaalays xusuusinayaa in laga arkikaro naqshadda ku dhegan warqaddaan Isagoo jooga weydiistihii waxaa loo soo mudey 4tii gees ee dhulkaas, waxuuna cadde-yey inuu rali yahay.

In kastoo siinta ay xeerar ku xerayso. Dawladda Soomaaliyeed waxba looma raacan karo illa iyo inta ay ka bixineyso "Amar Xeer" dhismo.

Xaashidaan siismada dhulka waxaa laga samey-nayaa 3 nuqul oo la kala siinayo : Danayaha. Qayb-ta Dhulka iyo Dhismaha, Dawladda Hoose ee ———


**Qofka la siiyey dhulka**

**Jiom. dhiibay dhulka**

**Madaxa Laanta Farsam. Dhulka**

Dawladda Hoose ee Gobolka ... Muqdisho

# = PLANIMETRIA =



IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sanadka 16aad Muqdisho 17 Juunyo 1988 L. 1 R 6

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 29 ee 10 Maajo 1988, Magacaabid Garsoore. BOG. 443

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE, IYO WIXII LA MID AH

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J/le Cambaro Maxamed Aadan L. 309 » 444

Wakaaladda Madbacada Qaranka

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J/le Cabdullaahi Abuura Maxamed L. 310 » 445

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Cali Qaasin Jacfar L. 311 » 446

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Axmed Cali Qaasin L. 312 » 447

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le C/laahi Maxamuud Mursal L. 313 » 448

DAWLADDA HOOSE MUQ. 3.1.88, Naado Dhul Sheekh Maxamed X. Saciid L. 314 » 449

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Xasan Xuseen Maxamuud L. 315 » 450

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Xasan Qaasin Jacfar L. 316 » 451

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Cabdulcasiis Iimaan Nuur L. 317 » »52

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Xuseen Qaasin Jacfar L. 318 » 453

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le Cali Qaasin Jacfar L. 319 » 454

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Naado Dhul J/le C/laahi Maxamuud Mursal L. 321 » 455

DAWLADDA HOOSE MUQ. 3.2.87, Naado Dhul J/le Xabiiba Cali Maxamed L. 321/bis » 456

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 14.4.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Yuusuf Maxamuud Xuseen L. 322 » 457

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 14.4.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Xasan Maxamed Cali L. 323 » 458

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR.

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le C/laahi Maxamuud Mursal uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 6.1.87 uu ku weydiistay ga tal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Trabesio Addimihiisuna yihiin 10÷20x40 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 364 W.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhulkiisi hore

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
J/le Aadan Xaashi Nuur.

L. 313